## U DOODAYAASHA KA FAA'IDEYSTAYAASHA IYO MACAAMIISHA

Adeegyada Caafimaadka Dhaqanka ee Degmada San Diego (Qorshaha) waxay qandaraas kula gashay laba wakaalad si ay kaaga caawiyaan xalinta walaacyada ka jira adeegyada caafimaadka maskaxda ama cillada isticmaalka mukhaadaraadka.

**Wixii la xiriira adeegyada Bukaan-jiifka ama Deganaanshaha wac:**

**U DOODISTA BUKAANKA JFS**

**619-282-1134**

ama

**1-800-479-2233**

**Wixii la xiriira adeegyada BUKAAN-SOCODKA:**

**CCHEA**

**(Xarunta Macmiilka ee Barashada Caafimaadka & U Doodista)**

**1-877-734-3258**

## SIDEE AYAAN U CODSAN KARAA DHAGAYSIGA GOBOLKA EE CADDAALADA AH?

Haddii aad tahay ka-faa'iideyste Medi-Cal oo aad soo martay Hannaanka Racfaanka Qorshaha, waxaad codsan kartaa Dhegeysiga Gobolka ee Cadaalad ah haddii aadan ku ganacsanayn go'aanka rafcaanka kama dambaysta ee ku saabsan go'aaminta gunnooyinka xaalada daran ee laga gaaray adeegyadaada. Dhageysiga Gobolka ee Cadaalada ah waa fursada aad dacwadaada ku horgeyn karto xaakimka sharciga si uu u xukumo. Dhageysiga Gobolka ee Cadaalada ah waa in lagu codsadaa 120 maalmood gudahooda laga bilaabo marka la helo go'aanka racfaankaaga. Waxaad sidoo kale codsan kartaa dhageysi ku saabsan in go'aanka racfaanka lagu gaari waayay wakhtigii ku habboon.

## CAAWIMAAD LA XIRIIRTA GUDBINTA CODSIGA DHAGAYSIGA

Haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad u gudbiso codsiga dhegaysi, waxaad la xiriiri kartaa wakaaladda u doodista ama waxaad **Waaxda Gobolka ee Adeegyada Bulshada** ka wacdaa **1-800-952-5253**.

Waxaad sidoo kale wici kartaa wakaaladda u doodista si aad u weydiiso wixii su'aalo ah ama warar cusub ah oo ku saabsan cabashadaada ama racfaankaaga.

# HANNAANKA CABASHADA IYO RACFAANKA

**ADEEGYADA CAAFIMAADKA DHAQANKA EE DEGMADA SAN DIEGO (QORSHAHA)**

***HAGAHA MACAAMILKA***

COUNTY OF SAN DIEGO

Ka macmiil ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad adeegyada ka hesho adeeg-bixiyaha caafimaadka dhaqanka oo aqoon leh iyo inaad qayb firfircoon ka qaadato daawayntaada. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay in aad muujiso wixii walaac ah oo aad ka qabto adeegyadaada, tusaale ahaan, haddii adeegyadaada la joojiyo ama aadan ku qanacsanayn daawayntaada ama daawooyinkaaga, ama aad dareento in laguula dhaqmay si ixtiraam darro ah.

## SIYAABAHA LOO XALLIN KARO WALAACAAGA

Haddii aad walaac qabto, sida ugu dhakhsaha badan ee arrimaha loo xalliyo waa inaad si toos ah ula hadasho adeeg bixiyahaaga ama maamulka barnaamijka. Haddii aadan ku ganacsanayn daawayntaada ama daawadaada, waxaad ra'yi labaad waydiisan kartaa dhakhtar kale oo ka tirsan shaqaalaha adeeg-bixiyahaaga ama **Khadka Helitaanka iyo Dhibaatooyinka 1-888-724-7240 (TTY: 711)**.

Ma jirto wax kharash ah oo kaaga baxaya ra'yiga labaad.

## WAA MAXAY CABASHO? WAA MAXAY RACFAAN?

**CABASHADA** macneheedu waa muujinta ku qanacsanaan la'aanta arrin kasta marka laga reebo go'aaminta gunnooyinka xaaladaha daran.

**RACFAANKA** macneheedu waa dib u eegis lagu sameeyo Qorshaha go'aaminta gunnooyinka xaaladaha daran:

1. Diidmada ama oggolaanshaha xaddidan ee adeegyada la codsado
2. Dhimista, hakinta ama joojinta adeegyada hore loo oggolaaday
3. Diidmada gabi ahaanba ama qayb ahaan ah, ee bixinta lacagtan adeega
4. Ku guuldareysiga in adeegyada lagu bixiyo waqti ku haboon (60 maalmood gudahood)
5. Ku guuldaraysiga Qorshaha inuu waxqabad sameeyo gudaha muddada loo qabtay ee xallinta caadiga ah ee cabashada ama rafcaanka
6. Diidmada codsiga isdiiwaangaliyaha si looga doodo masuuliyada maaliyadeed ee adeegyada

**Ogeysiiska Go'aaminta Gunnooyinka Xaaladaha Daran (NOABD)** waa warqad rasmi ah oo ku saabsan dacwad ku saabsan adeegyadaada. Waxaad ka qaadan kartaa racfaan haddii aad hesho NOABD.

## SIDEEN U GUDBIN KARAA?

- Afka/Hadal– taleefan ahaan ama shakhsi ahaan ugu dir Wakaalada U-doodista
- Qoraal ahaan adigoo buuxinaya foomka Cabashada iyo Racfaanka ee laga heli karo barnaamijkaaga ama xafiiska adeeg-bixiyahaaga
- Codsiyada rafcaanka afka ah waa in la raaciyaa racfaan qoraal ah

## XUQUUQAHAAGA KU AADAN HANNAANKA

- Si aad u codsato 10 maalmood gudahood in adeegyadaadu la sii wado iyadoo la sugayo natiijada rafcaankaaga
- Inaad xor ka ahaato takoorid ama ganaax maadaama aad gudbisay
- Si aad u hesho qarsoodinimo ilaalo aad ka hesho sharciga
- In laguula dhaqmo si sharaf iyo xushmad leh iyadoo la isticmaalayo luqad aad fahmayso
- Inaad oggolaato qof inuu ku matalo adiga
- Inaad hesho qof taageere ah oo ka soo qayb gala shirarka inta lagu jiro hannaanka.